



Bulshada PPS ee Qaaliga ah,

Shalay, intii lagu jiray kulankii Guddiga Waxbarashada ee Dugsiyada Dadweynaha Portland, waxaa la ansixiyay qaraar si loo wadaago Machadka ACCESS ee Dugsiga Hoose ee Vestal iyo Dugsiga Dhexe ee Lane.

Sida aad intiina badan ogtihiiin, go'aanku wuxuu yimiday ka dib qorshe muddo dheer socday si xalka ugu fiican loogu helo jawi adag. Degmadu waxaa soo wajahay isbedel ku yimid isqorista, xaafaddo si degdega ah isku beddelaya iyo xarumaha dugsiga ee la heli karo oo kooban. Waa in aanu bixinaa baahiyaha arday kasta oo ku baahsan Degmada, iyada oo tani ku bilaabanto siinta ardayda oo dhan la siinayo goob ay ku helaan waxbarasho miro dhal ah. Wawaanu aamisanahay in go'aankani naga caawinayo hadafkaasi. Ma jiraan xal fiican oo lagu hagaajiyo barnaamijka ACCESS, waana in aanu si wadajir ah u wada shaqeynaya hal bulsho ahaan si aanu si guul ah ugu hirgelino go'aankan loogu talagalay in ay ardaydu ka faa'iideystaan. Shaqadan inteeda badan waxay ku xiran tahay bulshada PPS oo idil oo isku timaada si ay u sameeyaan waxa u fiican ardaydeena.

Baahida loo qabo in la wareejiyo barnaamijka ACCESS waxaa keenay go'aanka Guddiga ee dayrtii la soo dhaafay si 1,300 oo arday oo ah bulshada aan taariikh ahaan sida fiican adeega u helin ee ku nool Waqooyiga iyo Waqooyiga bari Portland loo siiyo fursado loo siman yahay oo ka jirta goobta dugsiga dhexe oo dhammeystiran iyada oo la furayo Dugsiga Dhexe ee Roseway Heights. Go'aanka waxaa keenay baahida loo qabo in furo Rose City Park isaga oo ah dugsiga hoose ee xaafadda. Wawaanu qireynaa niyad xumida iyo walwalka ay qabaan kuwo badan oo ka tirsan ardaydeena, waalidiinteenaa, macallimiinteenaa iyo maamulayaasha bulshadani uu saameeyay go'aankani. Waxaa naga go'aan wanaajinta habka aan ula shaqeyno bulshada dugsiga ee ay saameeyay go'aanadani heerka degmo ah.

Ilaa taasi dhacayso, waxaanu la shaqeyn doonaa maamulayaasha iyo shaqaalahaa Vestal, Lane iyo ACCESS si loo qorsheeyo dhacdooyinka isdhexgalka bulshada iyo si loo aqoonsado baahiyaha taageero. Wawaan macluumaad dheeraad soo gelin doonaa website-yada dugsiga, oo ay ka mid yihiin jawaabaha su'alaha aanu helaynay, iyada oo nuqulo la turjumay laga heli doona dugsi kasta. Inkasta oo aan u sii jeedno fasaxa xagaaga, waxaan sii wadi doonaa in aan kaala soo xiriirno shaqadan muhiimka ah.

Haddii aad hayso su'aalo dheeraad ah, fadlan u dir pubinfo@pps.net ama si toos ah ula wadaag maamulaha dugsigaaga.